

Shaqada-bixiyaha

Goorma ayey bilaabanayaan Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato?

Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato waxay Minnesota ka bilaabanayaan 1da Jannaayo, 2026.

Waa immisa lacagta ceymiska?

Lacagta ceymiska Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato waxay noqon doontaa 0.7% ah mushaarka laga canshuuro shaqaalaha. Shaqa-bixiyeyaashu waxay shaqaalahooda ku dallici karaan ugu badnaan kala bar lacagtaas (ama 0.35%) oo waa in ay ka gostaan mushaarkooda.

Goorma ayaan bilaabeynaa bixinta lacagta ceymiska?

Lacagta ceymiska Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato waxaa shaqaalaha laga goosanayaa laga bilaabo 1da Jannaayo, 2026.

Sidee baan u bixineynaa lacagta ceymiska?

Shaqa-bixiyeyaasha ayaa leh koonto ay ku maamulayaan lacagta barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato. Barta internetka ayaa lagu soo gudbinayaa macluumaad marka ay soo dhawaato taariikhda bilowga barnaamijka.

Waa maxay waajibaadka iyo masuuliyadda shaqa-bixiyeyaasha ee Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato?

Shaqa-bixiyeyaashu waxay leeyihiin dhowr masuuliyadood oo muhiim ah oo ah barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato:

- Laga bilaabo bartamaha 2024, shaqa-bixiyeyaasha Minnesota jooga waxaa khasab ku noqon doonta in ay soo gudbiyaan mushaarka oo faahfaahsan, oo waa inay faahfaahintu tahay mushaarkii laga qaatay saddex bilood iyo saacadihii uu shaqeyay qof kasta oo ah shaqaale.
- Laga bilaabo dabayaaqada 2025, shaqa-bixiye kasta waa in uu barnaamijkan shaqaalaha u sheego. Barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato ayaa ogeysiiskan soo diri doona.
- Laga bilaabo Jannaayo 2026, shaqa-bixiye kasta waa in uu soo gudbiyo lacagtani ah ceymiska.

Barta internetka ayaa lagu soo gudbinayaa macluumaad marka ay soo dhawaato taariikhda bilowga barnaamijka.